

ADEEGYADA

Uruurinta Qashinka Guriga

Biffa Leicester Ltd waxay mas'uul ka tahay qaadista qashinka guriga ee asbuuc kasta kana qaadi doonto ilaa 117,000 qoys ee deggen magaalada Leicester. Laga billaabo Febraayo 2004, anagoo la kaashan doono Dowladda Hoose ee Leicester (Leicester City Council), waxaanu billownay *Sanduuqa Adeegga Dibuarshadeynta* kaasi oo beddeli doonoboorsadii cagaarneyd.

Qashin qubiyada aan marneyn


Haddii qashin qubkaada uusan marneyn maalinta la qaadi lahaa, fadlan waxaad la soo xiriirtaa Adeegga Maamulka Qashinka ee laga helo telefoonka 0116 252 7002. Kadib marka ay na oo gaadho cabashadaada waxaanu ku dadaali doonaa in qashinka lagaa soo qaado maalinta shaqada ee xigta.

Adeegga Sanduuqa Dib u Warshadeynta

Adeegga Sanduuqa Dib Warshadeynta wuxuu deggenyaasha u suurtaglein doonaa in dib loo warshadeeyo dhalooyinka, waraaqaga iyo caagagga tasi oo waxtar u lahaan doonto ilaalinta deegaanka. Deggenyaasha waxaa la siiyey sanduuq cusub oo 55 liitar ah oo dib loo soo warshadeeyey taasi oo oogu talagalay in ay ku soo ridaan waxyaabaha ay u baahan yihiin in dib loo warshadeeyo. Sheeyada dib loo warshadeeyano waa lala soocaa kadibna lagu ridaa baabuur qaanado leh.

WAXAAD SANDUUQA KU RIDI KARTAA	KUMA RIDI KARTID SANDUUQA
	
DHALADA (Dhalooyinka iyo dhalooyinka yar yar ee aan furka lahayn) XAASHIDA (wargeysyada, joornaal, waraaqaha iyo buugagta kataloogyada) CAAGAGGA (Caagagga caanaha iyo sharaabka) Eeg astaanta  ee ku taalo dhalaada caagga. Fadlan burburi inta aadan sanduuqa ku ridin.	DHALOYINKA JAJABAN / BAQSHADAHA / KAADHBOORADA BUUGAGTA / YELLOW BEEJIS GASACADAHA SHEEYADA KALE OO BALAASTIGGA

Xasuuso...

- Adeeggani wuxuu ku shaqeyaa nidaamka hal mar ee cusbuuciiba, waxaana Sanduuqa Dib u Warshadeynta la faaruqiyaa isla maalinta qashinka la qaadi doono.
- Haddii sheey aan ka ahayn ku qoran  liiska laga helo Sanduuqa Dib u Warshadeynta, lama qaadi doono.
- Fadlan sanduuqaada waa in aad dibadda soo dhigtaa ugu dambeyn 7:00 subaxnimo.
- Fadlan qasacadaha iyo koombooyinka waxaad ku riddaa binka qashinka ee luga leh waxaana lagu kala saari doonaa xaruunta dibuarshadeynta. Fadlan buugagta, kaadhboodhyada iyo yeelo beejiska waxaad geysaa Xaruumaha Dibu Warsheynta ee Bulshada (Community Recycling Centre) halkaasi oo dib loogu warshadeeyn doono.

Qaadista Qashimada Waweyn

Degeneyaasha way soo codsan karaan in laga qaado waxyaabaha badan ee aysan u baahneyn. Waxaad taasi kala xiriirtaa Leenka telefoonka ee Adeegga Agaasinka Qashinka (Waste Management Service) ee 0116 252 7002.

Caawinta Qaadista Qashinka

Deggeneyaasha duqooshinka ama curyaamiinta ah oo aan qashin qubkooda iyo Sanduuqa Dib u Warshadeynta aan geyn karin dibadda ama hareeraa waddada waxay soo codsan karaan kaalmo. Markaasi oo kale waxaa qofka lagula heshiin doonaa in qashinka laga qaado hal meel lana keeno halkaasi marka laga soo dadsho, tusale – dhanka illinka oo sanduuqa lagu soo celin doono goorta laga soo daadsho qashinka.

Haddaad u baahan tahay in qashinka lagaa qaado fadlan waxaad la soo xiriirtaa Adeegga Agaasinka Qashinka oo laga helo telefoonka 0116 252 7002.

Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta

Xaruunta Dibu Warshadeynta waxay deggeneyaasha u suurtagelisaa in ay dib u warshadeeyaan waxyaabaha aysan u baahneyn. Xaruunta looma adeegsan karo dibu warshadeynta waxyaabaha qashinka ee dukamada ama goobaha ganacsiga. Goobahaasi waxaa kelito loogu talagalay guryaha.

Waxaa Leicester ku yaallaa laba xaruumood ee ah Xaruumaha Dibu Warshadeynta. Faafaahinta iyo xilliyada ay furan yihiin waa:

Community Recycling Centre
Bridge Road
(Ka leexsan Spence Street)
Leicester

Saacdaha furitaanka : 8.00 subaxnimo ilaa 8.00 fiidnimo (Abriil-Sebteembar) 8.00 subaxnimo ilaa 6.00 galabnimo (Oktoobar-Maarso)

Community Recycling Centre
Islington Street
Freemans Common
Leicester

Saacdaha furitaanka : 8.00 subaxnimo ilaa 8.00 fiidnimo (Abriil-Sebteembar) 8.00 subaxnimo ilaa 6.00 galabnimo (Oktoobar-Maarso)

Xaruunta way qaban doontaa qashimada waweyn waxayna leeyihiin meelo dib loogu warshadeynn doono –




Betariga

Waad isticmaali kartaa betriyada la jaaj gareyn karo hana tuurin ilaa aad ka dhammeysatay. Dibu warshadeyn waad ku sameyn kartaa betariga baabuurka ee aadan u baahneyn waxaadna geyn kartaa Xaruunta Dibu Warshadeynta ee Bulsahada.



Baaskeliyada

Baaskeliyada aad u baaneyn waxaad geyn kartaa Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta.



Buugagta

Goobta Recycling Bring Sites ama Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta ayaad di ugu warshadeyn kartaa buugagta.



Gasacadaha

Gasacadaha alemuniyamka iyo birta waxaa dibu loogu warshadeyn karaa goobaha Recycling Bring Sites ama Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta.



Kaadhboodhyada

Waa in aad iska ilaalisaa iibsashada alaabta ku jira baakado ama xirmooyin waweyn waayo kuwo yar yar ayaa ka rakhiisan kuna habboon deegaanka. Kaadhboodhyada waxaad dibu warshadeyn ku sameyn kartaa goobaha Recycling Bring Sites ama Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta.



Qalabka Guryaha

SOOFA, oo ah hay'ad samafaleed oo uruuriso qalabyada duuga ah ee guryaha ee la sii isticmaali karo waxayna u geysaa dadka aan heli Karin ama u baahan. Waxaad kala xiriiirtaa telefoonka 2545283 ee kuu diyaarin doono in ay kaa soo qaadaan. Sidoo kale waxyaabaha aadan u baahneyn waxaad geyn kartaa Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta.



Qoboojiyaasha/ Qalabka Korontada iyo Sheyada kale

Qalabka korontada sida qaboojiyeyaasha, kuukarada iyo wixii la mid ah waxaa geyn kartaa Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta si loo warshadeeyo ama sheeyada wanaagsan waxaad ugu deeqi kartaa hay'adaha samafalka. Qaboojiyeyaasha iyo waxyaabaha kale waxaa laga sameeyaa birta, alemuniyamka iyo cagga waa la siku qasi doonaa..



Galaasyada

Dhalooyinka galaaska ka sameysan waxaa dib loogu warshadeyn karaa goobta Bring Sites iyo Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta. Badanka suubar maarketyada waxay leeyihiin meelo dhalooyinka iy caagga lagu rido.



Cagaarka/ashinka Beerta

Qashinka gurigaada waxad ka sameysan kartaa waxyaabaha lagu nafaqeeyo berta ama waxaad geyn kartaa Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta Kuwaasi waxaa ka mid ah killiibyada beerta, mankhasyada, jiridka geedaha iyo wixii la mid ah.

Waxaa loo adeegsadaa in laga sameeyo nafaqada beerta, taasi oo nafaqo u noqota dhirta.



Birta

Biraha duugga ah waxaad geyn kartaa Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta. Birta waxaa laga sameeyaa maqliyada, gasacadaha cuntada iyo wixii la mid ah.



Saliidda

Waxaad saliidda geyn kartaa (Saliidda macdanta kelito. Kuma jirto saliidda cuntada lagu kariyo) Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta.



Riinjiga

Environ waxay leedahay Mashruuca Dibu Riinjiyeynta (Community Repaint scheme) halkaasi oo riinjiga aan loo baahneyn ay u gudbiyaan Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta iyo wixii la mid ah. Haddii riinjiga uu badan yahay waxaad wacdaa Environ oo laga helo 0116 222 0222 ee kaa soo qaadi doono.



Xaashiyaha

Xaashiyaha, joornaalada, wargeysyada waxaad geyn kartaa Recycling Bring Sites ama Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta. Xaashiyaha waxaa laga sameeyaa boost kaadhya, sanduuqyada ukunta, xaashiyaha muskhusa iyo wixii la mid ah.



Caagagga

Dhalooyinka caagga waxaad geyn kartaa Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta. Waxaa laga sameyn doonaa koodhadhka taraafikada, hangarrada koodhadhka, baacaga alaabta lagu qaato, qalin qoriyada, funaanadaha, waxyaabaha lagu buuxsho duufeetyada, baacaha qashin qubka iyo wixii la mid ah.



Ciidda/ Waxyaabaha adag (ugu badnaan 5 bin ama in u dhiganta).

Kaasi waxaad dibu warshadeyn ku sameyn kartaa Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta .Kuwaasi waxaa laga sameyn doonaa sheeyada guryaha lagu dhiso.



Dharka

Dharka duugga ah waxaad siin kartaa samafallada ama waad dibu warshadeyn kartaa waxaadna keeni kartaa xaruunta Recycling Bring Sites ama Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta.


Dharka wanaagsan waxaa loo diraa waddamada dunida sedexaad: gaarka kalena waxaa laga sameeyaa

dun, buste, roogagga, duubka gudbiyaha codka, gacmaha iyo buuxinta kuraasta soofarka iyo kuraasta baabuurta.



Taayarka

Buugga telefoonada ka eeg garaashka kuugu dhow ee taayarrada dibu warshadeeyo.



Alwaaxa

waxaa lagu warshadeyn karaa Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta illaase ma qaadan doono alwaaxa ama qoriga qiradaweyn (MDF), kaadhboodhyada adag ama boodhyada kale.

Xilliyada ay xiran tahay Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta

Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta waxay xiran yihiin maalmaha Kirismaaska, maalinta ku xigta Kirismaaska, maalinta sanadka cusub.

Oggolaanshaha dhigista baabuurta ee xaruunta -

Looma baahno oggolaanshaha dhigista baabuurka. Dhamaan faananka, baabuurta tareelaha, bik-abyada (pic up) ka dheer 1.4 miitar waxay u baahan yihiin oggolaanshaha haddii ay doonayaan in ay isticmaalaan Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta. Akhbaar dheerad ah ama oggolaansho, waxaad eegtaa bogga intarneetka ee Koonsolka Leicester ama waxaad wacdaa Adeegga Agaasinka Qashinka oo laga helo telefoonka 0116 252 7002.

Goobaha Recycling Bring Sites

Waxaa jiraa in ka badan 100 goobood ee ah dibu loogu warshadeeyo qashinka ee ku yaallo Leicester halkaasi oo dadku ay dib ugu warshadeyn karaan qashinkooda, sida:

- Buugagta
- Gasacadaha
- Kaadhboodhyada
- Waraaqaha foylka
- Galaasyada (dhalooyinka, iyo kuwa yar yar)
- Xaashida
- Kabaha
- Dharka

Iyadoo lala kaashanayo doorka deggeneyaasha, waanu dhimi karnaa qashinka badan ee dhulka lagu aaso taasi oo dhimeyso waxyeellada degaanka. Doorakaaga wuxuu keeni karaa isbeddel WEYN!

KU SAABSAN BIIFARKA LEICESTER

Xaruunta Dibu Warshadeynta ee Xaafadda warshada ee Bursom **Nidaamka Dibu Warshadeynta ee 'Ball Mill'**

Dhammaan qashinka aan loo qaadin waxaa la geyn doonaa xaruunta dibu warshadeynta ee "bal mill" ee Bursom, taasi oo ka sameyso sheeyo yar yar ee laga sameeyo waxyaabaha beerta la bacrimiyo, xaashiyo, xaashiyaha iyo balaastiigana waxaa loo isticmaali doonaa shidaal, 20% soo haratna waxaa loo dirayaa dhulka lagu aaso.

Qashinka marka la soo qaado waxaa la geeyaa hool weyn ee ku yaallo Xaruunta Dibu Warshadeynta ee Bursom. Kadib qashinka waxaa lagu shubaa suun weyn oo ah 6.4 miitar (21 feet) kadibna wuxuu ku shubmi doonaa fuusto weyn oo ah 6.4 miitar (21 feet) oona aad u weyn (u eg mashiinka dharka lagu dhaqo oo weyn) waxaana ku jiraa balaoniyo bir ah 5.5 kg (12lb). Kubadda waxay ku wareegtaa gudaha fuustada waxayna burburisaa qashinka oo ay cad cad ka dhigtaa.

Xaashida sida wargeysyada, kaadhboodhyada, sanduqyada xabuubka iyo balaastiga sida kuwa caanaha iyo sharaabka waxaa laga dhigaa cad cad yar yar ka yar 80 milimitar (3 inches). Kadib kuwaasi waa laga saaraa sheeyada kale kuwaasi oo loo adeegsadao shidaal ahaan.

Shey kasta o ay ka mid tahay gasacadaha iyo koobooyinka ee ka sameysan alemuuniyamka waa la burbarin doonaa waana la kala saaraa birta iyo macdanta iyadoo la adeegsanayo birlab. Alemuuniyamka waxaa lagu soocaa shey loo yaqaano eddy current, kaasi oo ah kala saaraha birta aan feeraaska lahan. Birta wa la soocaa waxaana loo diraa shirkado oo si warshadeeyo.

Qashinka cuntada, sida qudaarta, hilibka iyo cuntada xilligooda la soo dhaafay iyo wixii la mid ah waxaa lagu daaweeyaa burburiyaha kubadda. Qashinka “orgaanigga” ah waxaa loo burburiyaa cad cad yar yar e ka yar 5 milimiitar (1/4) kadibna waxaa laga shaandheeyaa qashinka kale. Dhammaan sheyadani waxaa lagu ridaa konteynaro kadibna loo gudbiyaa Wanlip oo lagu qaban dono marxaladda labaad.

Inta soo hartaa waxay ka kooban tahay dhalooyin jajab ah, dhagxaan iyo waxyaabo kale oo culus ee ka kooban 1/5 ee dhammaan khashinka la soo qaado. Maaddaama aan wax badan laga qaban Karin qashinkaasi waxaa kadib loo diraa mel lagu aaso.

Sheeyada Bacrinka ee Hawsha Daaweynta Wanlip **Matoorka Shiidista ee Wanlip**

Biffa Leicester waxay keeneen qalabka burburinta ee Severn Trent Water's Wanlip Sewage Treatment Works, taasi oo sii warsadeyn doonto sheeyada orgaanigga ee qalabka dibu warshadeynta ee Bursom. Dhammaan qashinka waxaa lagu keydiyaa meel asturan, taasi oo leh meel ay hawada ka baxdo si uusan uga dhalan ur qurmoon. Marka la warshadeeynayo qashinka waxaa laga dhigayaa hoore, kadibna la karkarin doonaa si ooga saaro bekteeriyada kadibna lagu shubi doonaa daawo. Nefta ka soo baxdo marka la shiidayo waa mid aan dhibaato lahayn waxaana loo adeegsadaa dhalinta quwadda korontada. Kadib qashinka la warshadeeyey waxay Shirkadda Biyaha ee Severn Trent u suuq geysaa beeraleyda..

Nidaamka waxaa ka mid ah:

- Dhammaan hawsha waxaa lagu qabtaa dhismo xiran oo leh hawo ka ilaaliso in uusan ka dhalan ur qurmoon.
- Dhammaan hawsha shiidista waxaa lagu qabtaa 5 taank oo shiida.
- Gaaska methane ee ka dhasho loo adeegsadaa dhalinta quwadda korontada (qiyaasta 1.5 meegawaats – koronto ku fila ilaa 1500 guri).
- Dibu warshadeynta qashinka orgaanigga oo laga dhigi doono qashinka beerta loo isticmaali karo, taasi oo ah hadafka la tiigsanayo.
- Ku qasidda sheeyada qashinka.
- Telefiishan toos ah kula xiriirsan xaruun waxbarasho ee ku taallo adeegga dibu warshadeynta ee Bursom ee Leicester.

BULSHADA & WAXBARASHADA

Talooyinka diib warshadeynta

halka waxaa ku qoran talooyinka habka aad u ilaalin kartid deegaanka:

- Waa in aad isticmaashaa Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta iyo goobaha kale ee Recycling Bring Sites ee Leicester oodna dib u warshadeysaa qashinka.
- Meel ku astur baacaha alaabta lagu qaato, waana in goor kasta aad isticmaashaa ama aad geysaa meel dibu warshadeynta ee suubbar maarketyada, haddii kale waad isticmaali kartaa mar kasta kuna beddelan kartaa kuwa adag e muddo dheer la isticmaalo..
- Waa in aad isticmaashaa nalalka aan isticmaalin koronto badan oon muddo dheer la isticmaali karo.
- Waa in ad isticmaashaa sheeyo degaanka ku habboon sida sheeyada nadiifinta riinjiyeynta iyo waxyaabaha kale oo la mid ah.
- Waa in aad isticmaashaa labada dhan e xaashida, aadna isticmaashaa xaashiyaha aadan u baahneyn ka sameysataa buugga qoraalka.
- Waa in saaxibbada aad la wadaagtaa wargeysyada, oornaalka iyo buugagta. Waxaad buugagta, joornaalada iyo wargeysyada aad geysaa Bring Sites ama Xaruunta Bulshada ee Dibu Warshadeynta si dibu warshadeyn logu sameeyo.
- Waxyaabaha sida cudbiga iyo neebiyada waxay yihiin 4% ee qashinka aanu sameyno waxana la geeyaa melaha lagu aaso, halkaasi oo ay ku aasnaan karaan ilaa 500 sano.
- libso sheeyada dib loo isticmaali karo, kuwaasi oo korontada lagu kaarikeyn karo oo aad isticmaali kartid dhowr jeer.
- Waa in aad iibsataa alaab badan oo isku xiran si uusan u badan qashinka. Taasi waa dhaqaaleyn iyo ilaalinta deegaanka.
- Waa in aad iibsataa sheeyada dib loo warshadeeyey ama dib loo warsheyn karo. Waxaad egataa astaanta sheeyada dib loo warsheyn karo.
- Sheeyada sida qalabka guryaha , qalabka kombiyuutarka iyo wixii la mid ah waxaad ugu deeqi kartaa daka kale ee u baahan ama hay'adaha samafalka, koxaha bulsahada iyo wixii la mid ah.
- Mar kale isticmaal dhalooyinka iyo kuwa caagga oo cuntada lagu rito, kaadhboodhyada iyo wixii la mid ah oo la keyn karo.
- Waa in aad burburisaa qashinka jikada ama beerta. Qashinka jikada ama beerta waxaad geyn kartaa Xaruunta Dibu Warshadeynta ee Bulsahada.
- Ha isticmaalin sheeyada aan dib loo warshadeyn Karin sida wargeysyada, koobabka caagga. Sakiinta iyo wixii la mid ah. Goor kasta isticmaal koob muddo dheer aad isticmaali kartid.
- libso qalimaanta la gelin karo khad kale.

SU'AALLAHA JOOGTO LOO WEYDIYO

Muxuu yahay dibu warshadeynta?

Dibu warshadeyntu way sahlan tahay. Waa ka sameynta shey cusub shey hore oo duugobay. Shey isticmaalkiisa dhammaaday ayey isticmaalka ku soo celisaa taasi oo deegaanka iyo dhaqaalaha u roon. Waa u kala saaridda qashinka sheeyo la warshadeyn karo iyo kuwo kale, tusaale dhalooyinka duuga ah waxaad ka dhigi kartaa jaakado.

Maxay tahay sababta warshadeynta?

Dibu warshadeyntu waa muhiim waayo waxay deegaanka ka ilaalisaa boluushanka, waxayna dhaqaaleysaa tamarta waxyaabaha dabiiciga, warshadaha ayaa ka faa'ideystaa, dhaqaale iyo lacag bay kentaa.

Badeecada dib loo warshadeeyey

libsashada sheeyada dib loo warshadeeyey waxay waxtar u leedahay dhaqaalaha iyo deegaanka. Marka aad iibsatid shey dib loo warshadeeyey waxaad badbaadisay shey dabiici ah oo la isticmaali lahaa taasi oo waxtar weyn u lahaan doonto jiilka dambe iyo deegaanka.

Adeegga qaadista qashinka

1. Birta – qasacadaha iyo koombooyinka

Qasacadaha iyo koombooyinka waa in lagu ridaa qashin qubka lugaha leh (birta iyo alimuuniyamka) waa laga saari karaa qashinka kale marka la geeyo xaruunta dib u warshadeynta.

2. Caagag badan oo dib loo warshadeeyo

Haddaad haysatid dahlooyin badan oo dib loo warshadeyn karo oo lagu ridi karo qashin qubka waxaad ku soo ridi kartaa baacda caaffa kadibna saarta dusha qashin qubka.

3. Noocyada dhalooyinka caagga

Waxaanu dooneynaa 2 nooc, HD ama HDPE ee loo isticmaalo caanaha, shambuuga,sharaabka iyo wixii la mid ah iyo PE ama PET ee sharaabka aashatada leh. Jwaxaad eegataa astaanta soo socota:



4. Kaadhboodhyada

Fadlan kaadhboodhyada ku rid qashin qubka lugaha leh ee haku ridin Sanduuqa Dibu Warshadeynta. Kaadhboodhyada lagaa soo qaado waxaa la geeyaa warshadda kubbadda daqiiq ka dhigta qashinka halkaasi oo lagu kala saaro noocyo kala duwan ee loo adeegsan karo waxyaabo kala duwan. Xaashiyaha aadan u baahneyn waxaad geyn kartaa meelaha la geeyo ama Xaruumaha Dibu Warshadeynta ee Bulshada.

5. daboolka sanduuqa Dibu warshadeynta

Waxaad daboolka ka codsan kartaa leenka Adeegga Agaasinka Qashinka ee Leicester ee ah 0116 252 7002 illaase fadlan sanduuqa dibadda ha soo dhigin isagoo daboolka wato. Haka walaacin haddii uu qashinka roob ku da'o oo qoyo.


6. Sanduuqa Labaad

Sanduuq kale waad ka codsan kartaa leenka Adeegga Agaasinka Qashinka ee Leicester ee 0116 252 7002 haddii uu kaa buuxsamo sanduuqa kale oodna dhamaan qashinkaada wada geli kari hal sanduuq.if you are filling your box and cannot get all your recyclable items in one box but checks will be made.

7. Adeegga Caawinta Qaadista qashinka

Tadeegga Caawinta Qaadista qashinka waxaa loogu talagalay duqooshinka iyo dadka curyaamiinta ah oo aan dibadda geyn Karin sanduuqa qashinka. Fadlan.waxaad wacdaa leenka Adeegga Agaasinka Qashinka ee Leicester ee 0116 252 7002 haddaad u baahan tahay Adeegga Caawinta Qaadista qashinka.

8. Qoraalka sanduuqaotes for boxes

Haddii shey aan ku jirin  liska laga helo sanduuqa, lama qaadi doono waxaana sanduuqa lagu saari doonaa sanduuq laguugu sharxayo waxyaabaha aad ku ridi kartid sanduuqa. Fadlan ku rid sheeyada la nacay qashin qubka lugaha leh.

9. Qoraalka qashin qubka lugaha leh for wheelie bins

Qashin quv=bka qwashinka lagama saari doono haddii laga helo sheeyo aan la oggolayn sida bulkeeti, qalabka baabbuurta, waxyaabaha halista ah, daawooyinka la daadshay ama si aad ah loo buuxshay oo aan la gaari Karin qashin qubka.

10. Maxaa laga yeeli doonaa qashinka?

Sheeyada qalaylka ah sida xaashiyaha iyo balaastiigga waa la yareeyaa waxaana laga sameeyaa waxyaabo kale oo dib loo sii warsheeyo.

Dhammaan qashinka laga soo qaado gurigaada waxaa la geeyaa xaruunta dibu warshadeynta ee Burom halkaasi oo qashinka lagu kala saaro -

- Birta (birta iyo alimuuniyamka, qasacadaha cuntada iyo cabbitaanka) waa la kala saaraa waxaana loo diraa warshadeyn.
- Osheeyada orgaanigga waxaa loo diraa daaweyn dheeraad ah ee lagu sameeyo warshadda wanlip. Sheeyada laga soo saaro waxaa loo adeegsadaa beeraha iyo abuuritaanka quwad (taasi oo ilaa 1500 guri siiso koronto ku filan).
- Sheeyada shidaalka ka baxsan ee laga dhaliyo qashinka waxaa loo adeegsadaa sameynta shamiintada.

Qashin aad u badan ayaa loo diraa meesha qashinka lagu aaso.

NAGALA SOO XIRIIR

Customer Service Centre

'B' Block
New Walk Centre
Welford Place
Leicester
LE1 6ZG

Waste Management Service line

Saacadha uu furan yahay:
Isniin ilaa Jimco: 8.30 subaxnimo ilaa 5.00 fiidnimo

(0116) 252 7002 (telefoonka)

(0116) 255 9289 (fakis)

E-mail: environment.helpline@leicester.gov.uk